San Diego Unified School District

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

Terry B. Grier, Ed.D.
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada

Sebtember 2008

Mudaneyaal Waalidiinta iyo Dadka ilmaha masuulka ka ah:

Ku soo dhawaada sannad-dugsiyeedka 2008-09 ! Maadaama aad tihiin qoysaska carruurteenna, waxaad tihiin furaha ugu muhiimsan ee bilowga guusha sannad kale oo waxbarasho. Anigoo ku hadleya magaca macallimiinteenna, maamuleyaasheenna, shaqaalahenna taageerayaahsa ah iyo shaqaalaheenna maamulkaba, waxaan idiin ka mahadcelineyaa sida aad ilmihiinna ugu diyaariseen maalinta koowaad, iyo maalin kastaba, inuu dugsiga yimaado.

Waxaan rajeynayaa inaad xilligii xagaaga fasax wanaagsan soo qaadateen. Intii wakhtigaas lagu jirey waxay shaqaalaha waxbarashadda degmadu si aad ah ugu hawlanaayeen inay idiin diyaariyaariyaan waxyaabahihi loo baahnaa bilowga dugsiga. Waxaan isu diyaarinay missaniyada laga jaray waxbarashadda, iyadoo aan weli dawlad-goboleedka ka sugeyno ansaxintii kama-dambeysta ahayd ee miisaaniyada. Iyadoo arrimuhu aysan weli kala caddeyn, waxaan aad ugu faraxsanahay in dhammaan shaqaalaha wxabarshadda degmadu ay ahmiyada saareen waxbarashadda carruurta.

Maadaama aan bilaabeyno sannad-dugsiyeed cusub waxaan jecelahay inaan idin la wadaago qaar ka mid ah wararka ku saabsan guulihii sannad-dugsiyeedkii 2007-08 la gaadhay. Waxaan ku faraxsanahay inaan idin la socodsiiyo inay qiyaastii dhammaan fasalada ay ardeydeennu ka muujiyeen guulo wacan Barnaamijka Imtixaankii STAR loo yeqaano ee sannadkii 2008 la qaaday. Farshaxanka af Ingiriisiga waxay dhammaantood ahaayeen kuwo wanaagsan, marka laga reebo laba heerar fasalo ah, waxaana horumarka la sameeyey aad ugu wanaagsanaa fasalada 6, 8, iyo 9. Xaga xisaabta, waxay dhammaantood ahaayeen kuwo wanaagsan marka laga reebo laba heerar fasalo ah, waxaana horumarka la sameeyey aad ugu wanaagsanaa fasalada 4 iyo 8. Guud ahaan waxbarashadda degmada, buundooyinkii Farshaxanada Af Ingiriisiga sare u kaceen boqolkiiba 2 dhibcood, xisaabtana boqlkiiba 3 dhibcood.

Horumarka ay xaga saayniska ka gaadheen waxay mudan tahay in lagu amaano. Saddexdii sannadood ee la soo dhaafay, ardeyda fasalada 5, 8, iyo 10 waxay heleen 11 dhibcood oo dheeraad ah. Maadaama 2006, heerarka fasal 8aad iyo 10aad ay buundooyinkoodu kor u kaceen boqolkiiba 20 dhibcood fasalka 8aad iyo 21 dhibcood fasalka 10aad. Dhammaan buundooyinkanu waxay muujineyaan guulo wacan oo la gaadhay.

Horumarkan waxbarasho ee la sameeyey laguma helin oo keliya hawlkarnimada iyo dadaalka dheeraadka ah ee ay muujiyeen macallimiinteenna, maamuleyaasheenna iyo shaqaalaha waxbarashadda ee degmada oo jaal la ah waalidiinta iyo dadka ardeyda masuulka ka ah oo waxbarashadda ka dhigay mid muhimad weyn guriga ku leh.

Mustaqbalka waxaan rajeynaynaa, Guddiga Waxbarashadda Degmada oo Qorshaha loo yeqaano Proposition S oo loo codeyn doono bisha Noofember 4teeda . Proposition S, Maalgelinta 10-sanno ah, waxaa weeyaan Qorshaha Guud ee Dhismeyaasha Waxbarashadda Degmada ee Yoolalka Muddada-dheer ah. Haddii dadka doorashada bixineya ay boqolkiiba 55% ansxiyaan, wuxuu noqon doonaa:

- Wuxuu dugsiyadeenna si loo dayactiro ama dib-loogu cusbooneysiiyo siin doonaa qiyaastii lacaga dhan $2.1bilyan;
- Wuxuu fasalada iyo qalabka farsamada casriga ah ee qarnigan 21aad siin doonaa ardeyda sidii wax loogu bari lahaa.
- Wuxuu sii ballaadhin doonaa saamiga canshuurta Proposition MM tax $66.70 ee qiimaha hanti kasta $100,000 ee la qiimeeyey muddo 15 sannadood ah laga bilaabo 2029 ilaa iyo 2044;
- Wuxuu waxbarashadda degmadeenna u oggolaaneyaa inay dhammeeyaan Proposition MM, iyaga oo sameynaya hagaajinta hantida guud ee aysan maalgelinin Qorshaha loo yeqaano Proposition MM.

Waxaan idin ku dhiirigelineyaa inaad bartaan warbixinada ku saabsan Proposition S idinka oo akhrineya warqada warbixineed ee warqadan la socota. Wixii warbixin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa oo kale adiga oo gujiya www.sandi.net/PropS.

Waad ku mahadsan tihiin inaad nagu sharaftaan inaan carruurtiinna u adeegno. Sannad-dugsiyeed wanaagsan ayaan idiin rajeynayaa.
Si Daacadnimo ah,

Terry B. Grier, Ed.D.
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada

Somali version: Supt Letter to Parents Som 090208

San Diego Unified School District
Fact Sheet

Qorshaha Proposition S iyo Qorshaha Guud ee Dhismeeyaasha Waxbarashadda Degmada ee Yoolka Muddada-dheer ah

Dugsiyada San Diego Unified School District waxay leedahay in ka badan 200 dugsi, intooda badana waxaa la dhisay inta u dhexeysa 20-50 sannadood muddo laga joogo. Dugsiyadeenna badh ama nus ka mid ah waxay jiraan in ka badan 45 sannadood. Waxaan u baahanahay inaan dhismeyaashaas hagaajino, si aan baahida waxbarasho ee hada jirta u daboolo, una taageero waxbarashada iyo wax dhigista ee qarnigan 21aad, isla mar ahaantaasna, ay u ahaato meel ardeydeenna iyo shaqaalaheenna nabadgelyo u leh, jawi caafimaadna u leh. Bishii Luuliyo 23, 2008 waxay Guddiga Waxbarashadda ee Degmadu ansaxiyeen waajibaad guud oo ku saabsan qorshaha dugsiyada lagu dayactireyo ama lagu dhiseyo oo dadka cod bixiya la hor dhigeyo bisha Noofember 4, 2008, doorashada guud si loo caawiyo maalgelinta dhismeyaasha dib-u-hagaajinta u baahan.

Waxaa loogu magac daray **Proposition S**, Maalgelinta 10-sanno ah, waxaa weeyaan Qorshaha Guud ee Dhismeyaasha Waxbarashadda Degmada ee Yoolalka Muddada-dheer ah. Haddii dadka doorashada bixineya ay ansxiyaan, wuxuu noqon doonaa:

- Wuxuu u faa'iideynayaa dhammaan ardeyda iyo dugsiyada SDUSD;
- Wuxuu dugsiyada degmada siineyaa qiyaastii lacag dhan $2.1 bilyan, si ay hantideeda ugu hagaajisato.
- Wuxuu waxbarashadda degmadeenna u oggolaaneyaa inay dhammeeyaan Proposition MM, iyaga oo sameynaya hagaajinta hantida guud ee aysan maalgelinin Qorshaha loo yeqaano Proposition MM.
- Wuxuu sii ballaadhin doonaa saamiga canshuurta Prop. MM ($66.70 ee qiimaha hanti kasta $100,000 ee lagu qiimeeyey), taas oo dhammaaneysa sannadka 2029 ilaa iyo 2044. [Waxbarashadda degmadu waxay ku talo jirtaa inay dib u habbeyn ku sameyso lacagta maalgelinta, si qiyaastii saamigaas canshuurta loogu baahdo in lagu bixiyo lacagtaas maalgelinta ee dhammaan lacagaha maalgelinta ee degmada , taas oo ay ku jirto Prop. MM, ma kordhi doonto lacagtaas maalgelineed la soo jeediyey darteed. –Guddiga Waxbarashadda ee SDUSD qorshahaas wey ansaxiyeen]

Waxbarashadda degmadeennu waxay hada wax cusub ka dhigeysaa Qorshaha Guud ee Dhismeyaasha ee Yoolka Muddada-dheer. Maareynta dhismeyaashu waxay sameynayaan qiimeynta baahida oo dhammeystirran. Waxay qiimeyn ku sameeyeen meelihii miisaaniyada laga heli lahaa iyo waxay la tashadeen shaqaalaha degmada hanti-da loo sii dhiibo, si ay qiimeyntaas wax natiijadeedu ahayd ula wadaagaan; kala hadlaan kharashka, meelaha miisaaniyada laga raadineyo iyo kala mudnaantooda; iyo raadinta aragtiyada dadka kale ee kala duwan. Wacyigelinta waxaa ku jira:

- Shirarka ururada dugsiyada sare (in ka badan 710 ayaa ka soo qeyb galay, in ka badan 1400 ayey saacadaha iskaa-wax-u-qabso ah galiyeen shaqaale aan kuwa waxbarashadda degmada ahayn);
- Baadhitaandadii maamulaha (qiyaastii170 ayaa la soo celiyey);
- Guddiga loo abuuray arrimaha maalgelinta (qiyaastii 25 guddi ah oo iskaa-wax-u-qabso ah ayaa la sameeyey; lix shir ayaa la qabtay);
- Shaqaalaha Dhismeyaasha ee Ku-meel-gadhka ah (qiyaastii 50 xubnood; afar shir ayaa la qabtay).

Baadhitaankii koowaad ee la sameeyey waxay muujineysaa in qiyaastii $5.5 bilyan aysan dabooli karin baahida dhismeyaasha. Baahidu waxay sii badatey markii ay barnaamijyadii waxbarashadu isbeddeleen (tusaale ahaan, K-8 ee cusub iyo dugsiyada magnet); sare u qaadista farsamada casriga ah si ay heerarka maanta ula socoto, nidaamka nabadgelyada ee dib-u-hagaajinta; sare u qaadista adeegyada dadka naafada ah sida uu dhigeyo

Dhammaan ardeyda dugsiyada San Diego waxay ku qalinjebin doonaan xirfadaha,iyo niyad wanaagsan ee ay rabaan, waxayna ku guuleysayaan inay galaan kullejada iyo shaqo-xirfadeedka ay jecel yihiin , taas oo u saamaxaysa inay bulshada berrito ka mid noqdaan

Sharciga Mareykanka; dayactirka iyo casriyeynta marawaxadaha kuleylka iyo qabowgaba soo daaya, nidaamyada hagaajinta iyo dayactirka dhismeyaasha halaabay, iwm.

Meelaha ugu muhiimsan ee miisaaniyada laga helayo waxaa ka mid ah: dakhliga hantida ee dheeraadka ah, lacagta maalgeliyaha, miisaaniyada dib-u-hagaajinta, dakhliga dhismaha la kireeyey, miisaaniyada, nidaamka miisananiyada loo maareeyo, miisaaaniyada dhismeyaasha Dugsiyada ee dawlad-goboleedka, iyo Waajibaad Guud ama GO oo ah sida kan bisha Noofember loo codeynayo.

Waxaan u dhaw nahay inaan soo xidho oo ku guuleysano, qorshaha 10-sanno ee Proposition MM, kaas oo lagu maalgeliyey $1.5 bilyan si dhismeyaasha lagu hagaajiyo. Markii Qorshaha Proposition MM la oggolaadey, waxay maalgelisay lacag dhan $1.5 bilyan oo ka mid ah hantidii guud $4 bilyan ahayd ee loo baahna si dib-u-hagaajin loo sameeyo.

Wixii warbixin dheeraad ah ee mashaariicda la soo jeediyey ee Proposition S , waxaad ka fiirisaa http://www.sandi.net/PropS/.
Wixii warbixin dheeraad ah ee barnaamijyada lacagaha ee Proposition S, waxyaabihii uu Proposition MM dhammeystirray, iyo Qorshaha Guud ee Dhismeyaasha ee Yoolalka-muddada dheer; waxaad ka fiirisaa http://www.sandi.net/fac_mgmt.htm. Waxaad la xidhiidhi kartaa Bill Kowba, Madaxa Iskuduwida Hawlaha, oo telefoonkiisu yahay (619) 725-8191 ama Maamulka Dhismeyaasha oo telefoonkoodu yahay (858) 637-3603.